



LANDSTINGET BLEKINGE

**Macluumaadka xiriirka qofka dadka u qora qalabka caawimaadda**

Waxaa dib loo eegay 2016-04-22

Magaca qofka dadka u qora qalabka caawimaadda:

Meesha shaqada:

Tel nr:

Daryeel helaha:

Saxiixa magaca

**Waxa aad u  
baahantihid in aad ka  
ogaatid  
qalabka la kaashado**

**Macluumaadka xiriirka ee Xarunta qalabka caawimaadda**

Adeegga macaamiisha

tel. 0455 – 73 63 35

e-post: [hjalpmedelscenter@ltblekinge.se](mailto:hjalpmedelscenter@ltblekinge.se)

Cinwaan booqasho: Skrädderivägen  
371 55 Karlskrona



## LANDSTINGET BLEKINGE

- Beteriyada (A, AA, AAA, 9-folt iyo beteryada saacadaha)
- Isbeer baartiga iyo maasgarada ku aaddan CPAP-ga
- Saxammada fiilooyinka korontada ku aaddan TENS-ga

Dayactirka dhaawacyada uu qalabka caawimaaddu ku keenay tusaale ahaan hareeraha deegaankaaga ma bixinayo maamul gobaleedku ama degmadu.

### **Mas'uuliyaddaada**

Qalabka caawimaadda waxaa loo isticmaalayaa si waafaqsan tilmaamaha lagu bixinaayo waraaqaha tilmaamooyinka isticmaalidda iyo si waafaqsan warbixinta qofka dadka u qora qalabka caawimaadda uu ku siinayo.

Qalab kasta oo la kaashado waxaa la socda mas'uuliyad ku aaddan xannaaneytiisa, nadiifinta iyo daryeelkiisa.

Waa adiga ama qaraabadaada/waalidkaaga cidda mas'uulka ka ah qalabka caawimaadda inta lagu jiro waqtiga deynsiga.

Waa maamul gobaleedka Blekinge cidda iska leh qalabka caawimaadda. Lama oggola in la iibiyo ama cid la deymiyo qalabka caawimaadda.

Haddii qalabka caawimaadda loo geysto burbur aan caadi ahayn, waxyeello u gooni ah, la lumiyo ama la xado adiga ayuu megdhaw kugu waajibayaa. Sidaas darteed waa muhiim in aad iska eegtid waxa ceymiskaagu kaa daboolayo.

U geynta qalabka caawimaadda waxaa ku jira rakibaad qalab la isticmaalayo. Markaas ka dib daryeel helaha naftirkiisa ayaa bixinaya kharashka ku aaddan:

### **Dhaawac ama dhumitaan**

Xiriir la yeelo qofkaaga dadka u qora qalabka caawimaadda haddii dhaawac, dhumitaan/xatooyo, shil/ dhaawac khatar ah ay ku yimaadaan qalabka caawimaadda. Haddii ay xatooyo dhacdo waxaad ku wargelineysaa booliiska iyo shirkaddaada ceymiska.

### **Adeeg iyo dib u dayactir**

Adeegga iyo dayactirku waa kuu lacag la'aan haddii duugoobid caadi ah ay cilladdu ka timid. Ugu horreyn ahaan la xiriir qofkaaga dadka u qora qalabka caawimaadda.

Waxaad xitaa la xiriir kartaa Adeegga xagga farsamada ee Xarunta caawimaadda waqtiga taleefanka Isniin-Jimco 8.00 - 9.00, 13-00 - 14.00. Waqtiyada kale waxaa jirta fursad ah in farriin looga tago taleefanka farriimaha qabta tel. 0455 – 73 63 35 e-post: [tekniskservice.hmc@ltblekinge.se](mailto:tekniskservice.hmc@ltblekinge.se)

### **Guurid**



LANDSTINGET BLEKINGE

Haddii aad guureysid gudaha iyo dibadda gobalkaba waa in aad waqti fiican ka hor inta aadan guurin la xiriirtaa qofkaaga dadka u qora qalabka caawimaadda.  
Haddii gobalka ka bannaanka loo guurayo xeer ahaan waa in qalabka caawimaadda dib loo soo celiyo. Qalab caawimaad oo cusub ayaa laga heli karaa meesha uu deegaanka cusubi ku yaallo.  
Haddii aad iska qaadatid qalabka caawimaadda iyaadoo aan cidna xiriir lala sameynin, adiga ayaa mas'uul ka noqonaya in qalabka caawimaadda loo soo celiyo  
Maamul gobaleedka Blekinge.

### **Soo celin**

Haddii baahida loo qabo qalabka caawimaaddu ay dhammaato waa la soo celinayaa isagoo si fiican loo nadiifiyay. Haddii in kastoo uu qofka dadka u qora qalabka caawimaaddu ka dalbaday aadan soo celin qalabka caawimaadda waxaa kugu waajibaya megdhaw. Qofkaaga dadka u qora qalabka caawimaadda ama Xarunta qalabka caawimaadda kala xiriir,  
tel. 0455- 73 63 35